



## Superintendent Guerrero oo afar ku daray kooxda dhanka hoggaaminta

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay afar xubnood ku dareen kooxda dhanka hoggaaminta ee Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero.

Luis Valentino waxaa loo shaqaaleysiiyay in uu noqdo Madaxa Sare ee Waxbarashada, Jim Scherzinger oo noqon doona Madaxa Sare ee Dhaqaalaha ee Ku meel gaarka ah, Ryan Dutcher oo noqonaya Agaasimaha Miisaaniyadda ee Ku meel gaarka ah, iyo Stephanie Cameron oo ah Agaasimaha Sare, ee Isgaarsiinta iyo Arrimaha Bulshada.

“In la rumaysto gaarida qorshayaasheena istiraatiijiga ah ee aan hiigsanayno waxay u baahan doonaan hoggaaminta ugu fiican,” ayuu sheegay Guerrero. “Hoggaamiye kasta oo tayo leh oo aanu u keeno Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu ka turjumayaa tallaabo horay loo qaaday marka la eego sida aan u taageeri karno shaqada muhiimka ah ee macallimiinteenaa iyo siinta ardaydeena ee waayo-aragnimada ay ubaahan yihiin una qalmaan.”

Valentino ayaa PPS ula soo shaqeeyay la taliye ahaan tan iyo Diisambar isaga oo door dhexe ka ciyaaray sidii loo dejin lahaa manhajka iyo waaxda waxbarashada. Valentino wuxuu la soo shaqeeyay Guerrero markii uu ahaa Shaqaalaha Kormeeraha Guud/Madaxa Sare ee Waxbarashada ee Dugsiyada Middeobey ee Degmada San Francisco. Valentino wuxuu hoos imaan doonaa Ku-xigeenka Kormeeraha Guud ee Yvonne Curtis.

“Luis waa hoggaamiye iskaashi leh oo fahamsan sida loo maamulo waaxda waxbirida iyo waxbarashada, si uu nidaamka dugsiyada u lahaado awood urur si tilmaamaha dhanka waxbarashada ah oo muhiim ah loo siiyo dugsiyada, macallimiinta iyo hoggaamiyeyaasha,” ayuu sheegay Guerrero.

Scherzinger ayaa ku soo laabtay PPS, isaga oo hore u ahaan jiray Kormeeraha Guud iyo CFO. Magacaabidiisu waxay timid xilli ay socota dhisida-miisaaniyadda iyada oo degmada ay u gudbayso qiimeynta hawlgalada miisaaniyaddeeda iyo dhaqaalaheeda.

Scherzinger, oo sidoo kale doorar dhanka maamulka ah ka soo qabtay Sharci dejinta Oregon iyo Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon, wuxuu si toos ah u hoos imaan doonaa Guerrero.

“Degmadu waxay isla hadaba ka faa'iideysanaysaa khibradda uu dhaqaalaha u leeyahay Jim iyo fahamkiisa buuxa ee nidaamyada, dhaqanka, dadka iyo waxqabadyada ee PPS,” ayuu sheegay Guerrero. “Jim waxaa si qoto dheer uga go’an in uu adeego dadweynaha iyo waxbarashada dadweynaha, waxaan nasiib u leenahay in aan in uu qayb ka ahaado.”

Dutcher, oo u adeegi doona kooxda Scherzinger sidoo kale wuxuu ku soo laabtay degmada, isaga oo laba jeer soo noqday CFO ku meel gaarka ah. Sida iyada oo Scherzinger, Dutcher laga yaqaano PPS waa hubaal in ay faa'iido weyn keenayso iyada oo degmadu dhisayso miisaaniyadda sanadka soo socda, ayuu sheegay Guerrero.

“Ryan waa xirfadle aad u wanaagsan, waxaan ku faraxsanahay dadaalkiisa ku aadan waxa aan halkan ka qabanayno,” ayuu sheegay Guerrero.

Cameron waxay PPS uga timid Oregon Zoo, halkaasi oo ay ka soo noqotay Agaasimaha Isgaarsiinta iyo Suuqgeynta toddobadii sano ee la soo dhaafay. Cameron, oo hoos imaan doontaa Madaxa Shaqaalaha Stephanie Soden, waxay hoggaamin doontaa kooxda isgaarsiinta iyada oo qaabeyn doonta sida ay degmadu u sheegto sheekooyinkeeda iyo kordhinta codadka ardayda.

“Dhammaanteen waxaan wadaagnaa dan joogto ah oo kor loogu qaadayo kartida iyo awoodda aan leenahay in aad si cad, oo hufan, oo buuxda, isla markaana wax ku ool ah xiriir ula sameyno dhammaan dhinacyada wax daneeya,” ayuu sheegay Guerrero.